



Date: 14-Oct 2016

## **War Saxaafadeed**

Dalladda Metelayaasha bulshada aan Dawliiga ahayn ee PUNSAA waxa ay walaac ka muujineysaa dagaalada soo noqnoqanaya ee Magalada Galkacayo iyo guud ahaan Gobolka Mudug. PUNSAA oo dadaal ugu jirta sidii loo nabadayn lahaa dadweynaha ku dhaqan magaalada Gaalkacayo loona fududeyn lahaa in la furo wada hadal lagu dhameeyo khilaafaadka.

Colaadda Gaalkacayo ka jirta iyo guud ahaan gobolka Mudug waxa ay dhaawac u gaystay shacab aan waxba galabsan ee Waqooyiga iyo Koonfurta magaalada, waxay keentay barakac balaaran, dhaqaale burbur xoog leh iyo adeegyadii bulshada oo istaagay, sida, dugsiyada oo xirmay ka dib markii caruurtii laga qaxiyey oo ay halkaas waxbarashadoodi ku seegeen.

Sideedaba culayska dagaaladu waxay ay ku dhacaan dadka ugu nugul bulshada sida haweenka, carruurta iyo dadka da'da ah, waxana habboon in la ogaado in dagaalka natiijadiisu ay marwalba tahay khasaare dhaliya dhimasho, dhaawac, barakac, dhaqaale burbur iyo adeegyada bulshada oo xirma.

Waxa taas barbar soocda abaar baahsan oo ka jirta dalka Soomaaliy meelo badan oo ka mid ah oo Puntland iyo Galmudug ka mid yihiin halkaas oo dadkii iyo duunyadiiba ay ku sugan yihiin xaalad adag oo gurmada u baahan

Sidaas darteed waxa Dalladda PUNSAA ku baaqaysaa:

- In xabbadda la joojiyo oo la ilaaliyo xaquuqda dadweynaha lagana ilaaliyo dilka, dhaawaca, barakaca iyo burburka dhaqaale ee goor kasta ah;
- In la furo wada hadal lagu furdaamiyo khilaafaadka iyadoo saldhig looga dhigayo in ay soo gole fariistaan dadka ay taladu ka go'do ee labada dhinac.
- in la baaro sababaha ay colaadani u soo laalaabato;

- in aney Gaalkacyo u baahanyn ciidamo la keeno ee ay u baahan tahayn heshiisiin;
- in la joojiyo hadalada xanafa leh ee saxaafadda ay isu mariyaan madaxda labada dawladood iyo nabadoonada labada dhinac
- In Ummadda Soomaaliyeed aaney cid kale ka sugin in ay u xaliso dantooda ee loo baahanyahay in la helo dad Soomaaliyeed oo u guntada maslaxada Ummadda iyo hadba meeshii ay dhibaato ka taagantahay sidii loo damin lahaa.
- In dadweynaha iyo Dawladaha Puntland iyo Galmudug ay ogaadaan in ay yihiin deris aan sina u kala maarmin oo u baahan in ay isu bahaystaan ilaalinta amingooda gaar ahaan iyo guud ahaan Soomaaliya.
- PUNSAA waxa ay madaxda labada Dawladood ee Puntland iyo Galmudug ugu baaqaysaa in ay ka wada shaqeeyaan maslaxadda bulshadooda oo ay daawo u helaan khilaafaadka siyaasadeed ee ka dhexeeya, khilaafaadkaas oo laftiisu door weyn ku leh hurinta colaadaha

**Guddoomiyaha Bulshada Rayidka ah ee Puntland (PUNSAA)**

**Nuur shire Cismaan**

